Su'aalaha Badanka la Iswaydiiyo

Dhigaalada guriga ee HSB ee ka jira Swedbank

Waxaan ahay qof dhigaalka guriga ku leh Swedbank, maxay tahay inaan sameeyo?

Haddii aad tahay qof ku leh dhigaalkada guriga ee HSB Swedbank ama uga wakiil tahay dhigaalada guriga ilme yar, waxba ha samayn ilaa HSB kula soo xidhiidho marka la eego macluumaadka ku saabsan sida iyo goorta aad u wareejinayso dhigaaladaada guriga Danske Bank. Dhammaan dadka leh dhigaalada gurigu waa inay si dhakhso ah ugu wareejiyaan dhigaaladooda xisaabta Danske Bank 2020 si ay u sii haystaan dhibcahooga dhigaalka guriga.

Fadlan ogow awood u yeelan maysid inaad tallaabo qaaddo ilaa aad ka hesho macluumaad HSB kaasi oo waraaq ama iimeyl ah.

Maxaa dhici doona haddii aanan wareejin kaydka gurigayga?

Haddii aanad wareejin kaydka gurigaaga, kaydkaaga Swedbank waxa loo baddeli karaa akoon kayd joogto ah waxa aanad waayi doontaa dhibcahii home saver kaaga.

Waa maxay noocyada dhigaalada ee Danske Bank uu siiyo dadka leh dhigaalada guriga HSB?

Waxaannu bixinnaa xisaabta HSB Bosparkonto: xisaab iyo dhigaalada sanduuqa oo dulsaarkoodu sugan yahay oo leh kala doorashada 11 sanduuq. Macluumaad kusaabsan qaabab kala duwan ee dhigaalka ee la bixiyo waxaad ka heli kartaa halkan (danskebank.se/hsb).

Muxuu Danske Bank aanu u bixin xisaabaha kaydinta maalgashiga?

HSB suurtogal ayuu ka dhigi doonaa inaad ku kaydsato akoonada kaydinta maalgashiga mustaqbalka dhaw. Horumar xagga farsamada oo wayn ayaa loo baahan yahay inta aynaan halkaa isla gaarin, laakiin yoolku waa inaannu awoodno bixinta xisaabaha dhigaalka maalgalinta mustaqbalka dhaw.

Haddii aan iibiyo lacagtayda si aan u awoodo si aan ugu wareego Danske Bank, iibka miyaa la igu cashuurayaa?

Uma baahnid inaad iibiso maalgalinta kabka ah ee aad ku leedahay Swedbank adigoo u maraya HSB Bospar; taa baddalkeeda, waxaad wareejin kartaa hantidaada jirta iyada oon la cashuurin. Haddii aad doorato inaad ku iibiso saamiyadaada lacagaha aad ku haysato Swedbank si aad ugu gadato mid kasta oo kamid ah lacagaha cusub ee la bixiyay, waa lagu cashuuri doonaa sida caadiga ah.

Waxa aan doonayaa inaan sii wado kaydsiga lacag lamid ah ta iigu jirta Swedbank? Taasi suurtogal ma tahay?

Waad haysan kartaa dhigaalada aad ugu haysatay sanduuqyada Swedbank. Laakiin ma awoodi kartid inaad samayso dhigaal kale oo cusub lacagahan. Haddii aad jeclaan lahayd inaad sii wado kaydka lacagta , waxa aad u baahan doontaa inaad ka dhex doorato 11 lacagood oo uu bixiyo Danske Bank.

Waxaan jeclaan lahaa inaan xidho xisaabtayda dhigaalada guriga Swedbank kaasi oo bilaabmay kahor 2 Janaayo 2020. Sidee ayaan u bilaabaa?

Waxaad u gudbisay codsi xidhis xisaab bangigaaga caadiga ah waxaanad u sheegtay inuu u diro shaqo soo afjaris Swedbank. Kani waa foom ay tahay inaad buuxiso, bangigaaguna markaa wuxuu hubin doonaa in xisaabta la sheegay la soo afjaray iyo in lacagtaada laga soo wareejiyo xisaabta iyaga kaaga furan. Tani sidoo kale waxay khusaysaa haddii Swedbank uu yahay bangigaaga caadiga ah. Dhibcahaaga dhigaalka guriga dib ayaa loo soo bilaabi doonaa markii aad la baxdo lacagta dhigaalada guriga oo aad soo afjarto xisaabtaada HSB Bosparkonto.

HSB home savers cusub

Sidee ayaan u furtaa HSB Bosparkonto?

Fiidyaw kusaabsan sida tan loo samaynayo waxaad ka daawan kartaa halkan: *danskebank.se/privat/produkter/sparkonton/hsb/borja-bospara*

Ama ka akhri tilmaamaha halkan: *danskebank.se/privat/produkter/sparkonton/hsb/hsb-borja-bospara-olika-sprak*

Halkee ayaan kala socon karaa dhigaaladayda guriga ee Danske Bank?

Waxaad kala socon kartaa dhigaaladaada guriga adigoo ku galaya *danskebank.se/privat* aqoonsiga bangiga moobilka ama koodh bogos. Sidoo kale waxaad kala socon kartaa dhigaaladaada Bangigayaga Moobilka.

Waa maxay sababta bangigu su'aalo ii waydiiyaa markii aan dalbado inaan furto HSB Bosparkonto?

Waxaannu u baahanahay inaanu ku waydiino dhawr su'aalood markii aad dalbato inaad furato HSB Bosparkonto. Kuwani waa su'aalo ay tahay in dhammaan bangiyadu ay waydiiyaan macaamiishooda. Su'aaluhu waxay la xidhiidhaan sida aad u isticmaali doonto xisaabaha bangiga, iyo wixii lacago iyo adeegyo ah. Macluumaad kusaabsan sababta aannu su'aalaha dadka u waydiino waxaad ka heli kartaa halkan (*swedishbankers.se/foer-bankkunder/penningtvaett/daerfoer-maaste-banken-staella-fraagor/*).

Sidee ayey xisaabta Bosparkonto u shaqaysaa?

Xisaabta HSB Bosparkonto waxay u shaqaysaa si la mid ah sida xisaabta dhigaalka, marka laga reebo inaad sidoo kale hesho dhibcaha dhigaalka guriga. Waxa aad helaysaa 1 dhibic oo home saver ah 100 SEK oo kasta. Waxa aad heli kartaa ugu badnaan 5 dhibcood oo home saver ah bishii, taasi oo ka dhigan kaydinta billaha ah oo ah 500 SEK.

Dabcan waxaad dhigi kartaa lacag badan haddii aad doonto, wixii la dhigo ee intan ka badanna waa dhigaal saa'id ah. Waxa aad dhigaal ka dhigi kartaa qadar kasta, sidoo kale waxa aad samayn kartaa kala bixid. Haddii aad samayso kala bixid, qadarka waxa si toos ah looga jari doonaa kayd kasta oo dheeraad ah oo aad haysato. Haddii aadan haysan dhigaalo dheeraad ah xisaabtaada HSB Bosparkonto, waxaad lumin doontaa hal dhibcaha dhigaalka guriga ah SEK 100 kasta oo aad la baxdo. Waxa aad helaysaa dheef kaydkaaga ah Krona ugu horaysa.

Waxa aad heli kartaa ugu badnaan dhibco 60 home savers sanadkii, taasi oo ka dhigan 6,000 SEK oo kaydin ah. Wax badan ka akhri dhibcaha dhigaalka guriga: *www.hsb.se/stockholm/bospar/sa-fungerar-det/fortur-och-poang/*

Miyaa la ii oggol yahay inaan dhigto kaydsasho farbadan, tusaale ahaan sanadkii halmar? Mise waa inaan u kaydsadaa bille si aan u helo dhibco?

Waa suurtogal inaad kaysato aanad hesho dhibcaha home saver iyada oo aan la tixgalinayn inaad u dhigatay bille ama aad xaddi aad u badan dhigatay. Waxa aad heli kartaa ugu badnaan dhibco 60 home savers sanadkii, taasi oo ka dhigan 6,000 SEK oo kaydin ah. Si aad u kasbato dhibcaha dhigaalka guriga markii aad dhigayso lacag buuran, qadarka waa in hore loo sii dhigo. Tani waxay ka dhigan tahay in si aad u hesho dhibcaha ugu badan, waa inaad dhigto lacag buuran oo dhan SEK 6,000 Janaayo.

Sidee ayaan u dhigi karaa qadar bille ah HSB Bosparkonto?

Waxaad ka samaysan dhigaaladaada bangiga iyo xisaabta kuwaasi oo aad rabto in lacagta laga saaro laguna bixiyo xisaabtaada HSB Bosparkonto. Bangi kasta wuxuu leeyahay qaabab gaar ah oo uu tan u sameeyo. La xidhiidh bangiga haddii aadan hubin. Marka la eego ikhtiyaarada oo dhan, waa inaad taqaan lambarka xisaabta ee xisaabtaada HSB Bosparkonto.

Sidee ayaan ugu samaysan karaa qorshe dhigaal oo bille ah xisaabtayda HSB Depå marka la eego xisaabtayda HSB Bosparkonto ama lacagaha ka socda bangi aan ahayn Danske Bank?

Waxa aad u baahan tahay inaad la xidhiidho baanka kaasi oo wareejinta laga samayn doono. Sheeg lambarka xisaabtaada HSB Bosparkonto oo ah xisaabta helaha.

Haddii aad dooratay inaad dhigato lacagaha, qadarka waxa laga saari xisaabtaada HSB Bosparkonto waxaana lagu shubi xisaabtaada HSB Depå, iyo sanduuqyada iyo qoondada aad dooratay.

Miyay dhigashadu dammaanad qaadaysaa nidaam habaysan oo kaydsashadayda guriga ah?

Adigu macmiil ahaan waxa ku ilaaliyay nidaamka deebaajiga qaadida ee loo yaqaan Danish Guarantee Fund (Garantifonden). Waxa ay siisaa ilaalin qadarla lacag u dhiganta ugu badnaan 100,000 EUR dhigtihiiba. Waxa laguu oggol yahay qadarka dheefta ee lagu heshiiyay ilamaa joojinta bixinta ah/kicitaan haddii qadarka ugu badan ee magdhawga ahi aanu dhaafin. Magdhawga waxa bixin doona Xafiiska Daymaha Qaranka ee Iswidhan. Ka eeg macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Danish Guarantee Fund halkan *www.garantifonden.dk*.

Miyaa la ii oggol yahay inaan la wadaago kaydka gurigayga; tusaale ahaan, miyaan wadaagi karnaa aniga iyo saygaygu akoonka kaydka guriga?

Maya kaliya hal qof ayaa noqon karta cidda akoonka haysa.

Waxa aan doonayaa inaan u wareejiyo kaydka gurigayga qof kale. Sidee ayaan taas u sameeyaa?

La xidhiidh ururkaaga HSB ee goboleed ama ka soo dejiso foomka wareejinta halkan *hsb.se*. Helaha dhigaaladaada gurigu waa inuu xubin ka yahay HSB waana inuu bixiyey khidmada xubinimada oo uu noo yahay macmiil dhigaalada guriga ah.

Maxaa dhacaya haddii aan joojiyo xubinnimadayda HSB?

Xisaabtaada HSB Bosparkonto waxay isku baddali xisaab dhigaal oo caadi ah. Xisaabta HSB Depå för fondsparande waa la joojin, waxaana la samayn xisaab haynta ilmaha oo cusub. Sanduuqa waxa loo wareejin doonaa akoonka cusub. Xisaabta HSB Fastränteko nto – xisaabtu waxay noqon mid sii jirta ilaa taariikhda xidhista markaasi oo baaqiga si otomaatig ah loogu wareejin doono xisaabta dhigaalada (isku lambar xisaabeed yihiin).

Waa maxay xarfaha baadisooca Danske Bank?

Afarta god ee u horreeya ee lambarka xisaabtaada ayaa ah xarfaha baadisooca.

Dhigaalada guriga ee carruurta

Sidee ayaan ugu furaa xisaab HSB Bosparkonto ilme yar?

Fiidyaw kusaabsan sida tan loo sameeyo ayaad ka daawan kartaa halkan: *danskebank.se/privat/produkter/sparkonton/hsb/borja-bospara*

Ama tilmaamaha halkan ka akhri: *danskebank.se/privat/produkter/sparkonton/hsb/hsb-borja-bospara-olika-sprak*

HSB Depå för fondsparande

Waa maxay sanduuq?

Sanduuqu waa saamiyo la ururiyay ama saamiyo kale kuwaasi oo siwada jir ah ay u leeyihiin kuwan maalgaliyay. Adiga oo maalgalinaya sanduuqa, waxa aad faafinaysaa halis adiga oo sanduuqa ku maalgaliyay meelo kala duwan. Shirkad sanduuq ayaa maareynaysa sanduuqa.

Imisa nooc oo sanduuqyo ah ayaa jira?

Sanduuqyada maaliyadeed waxa loo qaybiyaa dhawr nooc oo kala duwan iyada oo lagu salaynayo xeerka maalgashiga. Qayb kasta oo muhiim ahi waxa ay leedahay dhawr nooc oo sii kala duwan. Sanduuqa maaliyadeed hadda waxa kujira HSB Bospar waxana kujira aaminaada iyo lacagaha dakhliga.

Lacagta maalgelinta badan

Lacagta maalgelinta badanwaa mid ku maalgaliya ugu yaraan 85% hantida saamiyo. Kuwani waxa ay yeelan karaan dhawr meelood oo kala duwan, sidoo kale marka lagu maalgaliyo gobolo iyo warshado kala duwan. Lacagta maalgelinta badan waxa ay yeelan kartaa dhawr halisood oo kala duwan iyada oo ku xidhan nooca maalgashiga. Haddii sanduuqa lagu maalgaliyo suuq kaasi oo leh isbddel fara badan iyada oo ay ugu wacan tahay xaddiga sarifka ama

dhaqaalaha adduunka, nooca halistu way sii saraynaysaa. Sanduuqa suuqa sare u socda ayaa tusaale u ah noocan sanduuqa.

Sanduuqyada dakhliga sugan

Sanduuqa dakhliga sugan waa sanduuq kaliya maalgaliya sikiyuuritiyada dulsaarka leh sida daymaha iyo daynka qasnadda dawladda. Sanduuqa dakhliga sugan sida badan waa ka halis yar yahay sanduuqa maalgalinta, tusaale ahaan. Noocyada kala duwan ee sanduuqa dakhliga aan isbaddelin waxa kamid ah, tusaale ahaan sanduuqa dakhliga aan isbaddelin ee wakhtiga gaaban, sanduuqa dakhliga aan isbaddelin ee wakhtiga dheer, sanduuqyada la xidhiidha sixir bararka iyo sanduuqyada la xidhiidha saamiga lawada leeyahay.

Waa maxay farqiga u dhaxeeya sanduuqyada maaliyadeed shaqeeya iyo kuwa dadban?
Sanduuqa sida dadban loo maareeyay waxa uu raacaa qaab, tusaale ahaan OMXS30, taasi oo ka kooban 30 ka saami ee ugu badan ee lagaga ganacsado Nasdaq Stockholm. Sanduuqa shaqaynaya, maareeyaha sanduuqa waxa uu qabtaa inuu ku dedadaalo inuu sameeyo shaxdan mid ka wanaagsan. Maareeyayaasha sanduuqu waxa ayu doortaan saamiyo cayiman oo ay rumaysan yihiin inuu samayn doono mid ka wanaagsan. Sidaa awgeed, kharashka la xidhiidha sanduuq shaqaynaya badanaa inyar ayuu ka sareeyaa sanduuqa dadban.

Waa maxay noocyada halisaha halkaa jira?
Dhammaan sanduuqyada waxa loo kala saaraa qiyaas ah 1-7, halkaas oo 1 u taagan tahay khatarta ugu yar 7 na ay u taagan tahay khatarta ugu badan. Macluumaad badan oo ku saabsan kani waxa laga heli karaa xaashida sanduuqa maaliayadeed. Guud ahaan, wakhtiga ugu badan oo aad kaydka ku hayso maaliyad, waa marka aad la kulmayso halisaha ugu badan.

Sidee ayaan u furan karaa xisaab ah HSB Depå för fondsparande?

Haddii aadan furan xisaab HSB Depå oo ay la socoto inaad ku yeelato xisaabta dhigaalka guriga Danske Bank, waxaad dalban kartaa xisaab HSB Depå markii aad doonto adigoo dhag siinaya 'Öppna HSB Depå för fondsparande' boggaaga hore ee Hembanken. Sidoo kale waxa aad tagi kartaa liiska 'Placera' ee Hambanken doorana 'HSB Depå'. Dhagsii 'Beställ', ansixi shuruudaha iyo xaaladaha galna adiga oo isticmaalaya BankID, waxana aanad diyaar u ahaan doontaa inaad ka ganacsato sanduuqa kujira HSB Bospar.

HSB Depå waxa uu ku xidhan yahay HSB Bosparkonto kaaga, waxaanad ka ganacsan kartaa lacagaha kujira xisaabtaada HSB Bospar ee ka socda HSB Depå.

Waa maxay deeqaha uu bixiyo Danske Bank?

Danske Invest Sverige Beta (Hurda)

Danske Invest SRI Global (Hurda)

Danske Invest Sverige (Firfircoon)

Danske Invest Sverige Småbolag (Firfircoon)

Danske Invest European High Dividend (Firfircoon)

Danske Invest Global Stockpicking

LU0117088970 (Firfircoon)

Danske Invest Global Emerging Markets (Firfircoon)

Danske Invest Sverige Kort Ränta (Firfircoon)

Danske Invest Sverige Ränta (Firfircoon)

Parvest Aqua (Firfircoon)

Parvest Climate (Firfircoon)

Wax badan ka baro *halkan*(*danskebank.se/privat/produkter/sparkonton/hsb/hsb-depa-for-fondsparande/mer-om-valbara-fonder-for-hsb-bosparare*) oo kusaabsna doorashada sanduuq.

Muxuu Danske Bank u doortay deeqahan gaarka ah?

Sanduuqyada doorashadooda waxa lagu saleeyey markii lala xaajooday HSB, halka hammigayagu uu ahaa inaanu siino dadka leh dhigaalada guriga fagaare ballaadhan oo ay suurtogal tahay in la isugu keeno bortifooliyo si fiican loo farraqay. HSB sidoo kale waxa uu doonayaa deeqo kala duwan oo xaddidan. Danske Bank iyo HSB waxa ay isku raaceen liiska hore usii jiray ilamaa uu bixiyo labadaba mid firfircoon iyo mid dadbanba, deeqaha dakhliga iyo caymis aad u ballaadhan.

Sidee ayaan uga samaysan karaa dhigaalada sanduuqa bille ah HSB Depå?

Waxaad ka samaysan kartaa sanduuqyo dhigaal oo bille ah HSB Depå laba tallaabo:

1. Ka samayso dalabka qayb bixinta oo ka imanaya xisaabta aad doonto (noqon kara bangi kale) ilaa xisaabtaada HSB Bosparkonto.
2. Samee nidaamka iibka billaha ah ee sanduuqa. Raac tallaabooyinkan:

1) Dhagsii 'Månadsspar fonder' ee boggaaga ama tag liiska 'Placera' doorana 'Månadsspar fonder'.
2) Dhagsii bogoska 'Nytt Månadsspar'.
3) Gali macluumaadka loo baahan yahay, dooro lacagta ka timiday 'HSB Bospar' liistee hubina in HSB Depa loo doortay dhacdada inaad leedahay hal akoon oo hayn.
4) Muuji inaad akhriday xaashida xaqiiqda dhagna sii OK.
5) Qorshahaaga ku xaqiiji BankID-gaaga iyo baadisooca adeegga.

Haddii aad dooratay inaad dhigato sanduuqyo, qadarka waxa si otomaatig ah looga wareejin xisaabtaada HSB Bosparkonto loona wareejin HSB Depå, iyo sanduuqyada iyo qoondada aad dooratay.

Waa maxay sababta aan maalka ugu kaydsanayo nidaam billaha ah?
Inaad u kaydsanayso nidaam bille ah macnaheedu waa inaad halista wakhtiga ku qaybinayso. Habka ugu fudud ee aad ku hubin karto inaad u kaydsatay si joogto ah waa inaad u marto kaydinta tooska ah bil kasta. Tani macnaheedu waa inaad gadatay saamiyo maalka ahaa kuwaasi oo hooseeya sareeyana, taasi oo ka dhigtay saamigaaga inuu horumaro si ka duwan sidii hore. Sidoo kale maaha inaad ka warwarto maalgalinta dhammaan raasamaalkaaga meel qaldan wakhti.

Miyuu jiraa qadarka ugu yar oo la awoodo in lagaga ganacsado sanduuqa?
Xaddiga ugu yare ee laga ganacsan karaa dhammaan maaliyadaha HSB waa 100 SEK. Tani waxa ay ku haboon tahay labadaba kaydsasho bille ah iyo gadasho joogto ah.

Sidee ayaan u iibsan karaa sanduuqyo maaleed xisaabtayda HSB Depå?
Tag Placera' ee Hembanken, doorana 'köp/sälj'. Dooro HSB Bospar in 'Kurslista'. Liiska maaliyada kuwaasi oo muuqda, dhagsii 'Köp' meesha ku xigta sanduuqa aad doonayso inaad gadato. Gali qadarka ama tirada, dhagsii 'Fortsätt för att köpa' si aad u gadato, galna BankID. Sidoo kale waxa aad isticmaali kartaa baanka mobilka si aad u dhammaystirto dhaq-dhaqaaqa.

Sidee ayaan u iibin karaa sanduuqyo xisaabtayda HSB Depå?
Tag Placera' ee Hembanken, doorana 'köp/sälj'. Dooro HSB Depa ee 'Kurslista', dhagna sii 'Sälj' ee ku xigta maaliyada aad doonayso inaad iibiso. Gali xaddiga ama tirada, dhagsii 'Fortsätt för att sälja' si aad u iibiso, saxeexna BankID. Sidoo kale waxa aad isticmaali kartaa baanka mobilka si aad u dhammaystirto dhaq-dhaqaaqa.

Maxay ku baxaysaa in la gato maaliyada HSB Depa?
Haysashada xisaab HSB Depå ah waa bilaa lacag. Si kastaba ha ahaatee, waa jira lacag sanadle ah oo lacag kasta oo aad maalgaliso; lacagta waxa lagu sheegay boqolay ahaan xaddiga la maalgaliyay. *Waa tan shaxda oo faahfaahsan* (*danskebank.se/-/media/files/se/pdf/privat/faktablad/fonder-hsb-erbjudande.pdf?rev=9f7f5913cf9a4877a1f34e9f5ae9a9b6&hash=B2DEDE943D4D78202A3BBC9515DB062C*) oo ay ku qoran yihiin macluumaad sare oo kusaabsan kharashka iyo fiiga sanduuqyada.

Marka la iibinayo maaliyada, waa inaad caddaysaa faa'iido kasta oo aad ka samayso iibintooda waa cashuur celintaada. Shirkadaha maalku sidoo kale waxa ay siin doonaan Wakaalada Cashuuraha ee Iswidhan macluumaadkan.

Maxaa ku dhacaya dhibcaha xisaabtayda dhigaalka guriga marka qiimaha sanduuqyadaydu kordhaan?
Macaashka ka yimaada iibinta sanduuqyada (iyo dulsaarka saaran lacagaynta xisaabaha dulsaarka sugan) ayaa loo maarayn sida waxa loo yaqaan dhigaalada dheeriga ah. Dhigaalada dheeraadka ah ayaa markaa loo rogaa dhibco (u dhigma shan ah dhibcaha dhigaalka guriga) ee xisaabta dhigaalada guriga ee bilaha aanad dhigayn qadarka ugu badan ee SEK 500 bishii xisaabtaada dhigaalada guriga.

Suurtogal ma tahay inaan qaybiyo dhigaaladayda guriga si qayb kamid ah loo dhigo xisaabtayda dhigaalada guriga qaybta kalena sanduuqyada?
Haa, taasi waasuurtogal. Waxa aad go'aansan kartaa imisa oo kaydkaaga guriga ah ayaad dhigan kartaa akoonka ama sanduuqa.

Markii hore waxa aan awooday inaan doorto deeqaha Nordic Swan Ecolabel, laakiin Danske Bank ma haysto wax deeqo ah caddayntan. Taasi maxay u dhacday?
Sanadkii tagay, waxaannu ku dadaalnay inaanu sare u qaadno shaqadayada joogtaynta. Guud ahaan waxa aan haysanaa koox cusub oo leh shaqooyin kala duwan iyada oo la tixgalinayo maalgashiga joogtada ah. Waxa aanu go'aansanay halkan in aanan caddayn mid kasta oo kamid ah wax soosaarkayaga Nordic Swan Ecolabel anaga oo aan doonayn inaan xaddidno sida aan sare ugu qaadnay qodobada joogtaynta ee habkayaga, waxsoosaarka iyo latalinta.

Maxaa ku dhacaya xisaabtayda HSB Depå iyo sanduuqyada halka aan maagalinayey haddii aan buriyo xubinimadayda HSB?
Xisaabtaada HSB Depå waa la soo afjari haddii aad soo afjarto xubinimadaada HSB. Hantidaada waxa loo wareejin Depå kale haddii aadan isla markaa iibinin. Wax badan ka baro *sanduuqyada(https://danskebank.se/privat/produkter/placeringar/fonder)*.

<u>HSB Fastränteko</u>nto

Waa maxay dulsaarka aan ka heli doono Fasträntekonto?
Dulsaarka Fastränteko**n**to wuxuu ku xidhan yahay horumarka sicirrada dulsaarka ee suuqa. Dulsaarka caadiga ah ee bangiga ee Fastränteko**n**to oo leh muddo ku xiriirsan oo saddex sano ah hadda waa 0.50%. Haddaad tahay qof leh dhigaalka guriga HSB, waxaad heli doontaa kab dheeraad ah oo hadda taagan 0.05%. Sicirka dulsaarka ee wakhtigan ee HSB Fastränteko**n**to waa 0.55%.

Maxay tahay sababta aan u dhigayo Fasträntekonto?
Fastränteko**n**to waa ikhtiyaar haddii aad rabto inaad samayso maalgalin ammaan ah oo aad sii ogaato macaashka aad heli doonto.

Ma dhigi karaa dhigaalo bille ah Fasträntekonto?
Ma dhigi kartid dhigaalo bille ah Fastränteko**n**to.

Ma dhigi karaa oo ma ka saari karaa lacag inta lagu jiro muddada saddexda sano ku xiran?
Ma dhigi kartid oo ma ka saari karaa lacag inta lagu jiro muddada saddexda sano ku xiran.

Maxaa dhacaya haddii aan baddalo bangiyada?
Waxa dhici karta in xisaabtaada la xidho haddii aad baddasho bangiyada. Khidmad ayaa sidoo kale la saari karaa, iyadoo ku xidhan muddada u hartay inay xisaabtu shaqayso.

Wali ma samayn karaa dhigaalo xisaabtayda Bosparkonto haddii aan furto Fasträntekonto?
Wali waad samayn karaa dhigaalo xisaabtaada Bosparkonto haddii aad furato Fastränteko**n**to. Waxa jira laba akoon oo kala duwan.

Suurtogal ma tahay inaan furto Fasträntekonto kale?
Haa, waxaad yeelan kartaa dhawr xisaabood oo ah Fastränteko**n**to.